# Soo Koobitaan

## Soo Koobitaanka Fulinta

Mashruuca Boostaajada Wadada Sound Transit's Graham Street wuxuu ku dari doonaa boostaajo oo ku taala wadada Layn 1 ee Wadada Tareenka Fudud ee u dhaw Martin Luther King Jr Way South ee u dhaw South Graham Street ku taala Rainier Valley. Goobta boosteejadaan waxa lagu daray qorshaha nidaamka cod bixiyuhu ansixiyay Sound Transit 3 (ST3).

**525 qof** ayaa buuxiy **xog aruurinta khadka onlaynka ah**

**252 qof** ayaa rukuntay wargalinada mashruuca

In ka badan **50 qof** ayaa ka qaybgalay **Bandhiga furan ee fool ka foolka ah**

In ka badan **220 qof** ayaa ka qaybgalay **munaasabada wada xaajoodka 5 qof ah ee fool ka foolka ah**

Waxaa lala kulmay dadka si loola yeesho **7 wareysiyada bulshada ah** loona **siiyo warbixin kooban**

Waxaa **5,044 boosto** loo diray dadka agga mashruuca u jira **1/2-mayl**

Waxaa la helay **23,110 ka qaybgal** iyo **1,280 kamid ahna dadka waxay kaga heleen** baraha bulshada

Sound Transit waxay qabatay dhowr hawlood si ay uga qaybgalinaya xubnaha bulshada.

Bishii Maarso ilaa Maayo 2024, waxaanu qabanay todobo waraysi oon la yeelanay bulshada. Hadafka kuwan wareysiyadaan waa in lagu bixi macluumaadka mashruuca, xiriiro wanaagsan lala dhiso bulshooyinka deegaanka, lalana socodsiiyo Bulshada Qorshaha Ka qaybgalina iyo Isgaarsiinta. Waxaan la hadalnay xubnaha bulshada iyo wakiilada ururada ku saleysan-bulshada. Inta lagu jiray mudada waraysiyada, waxaan maqalnay taageerada boosteejada.

Waxaan qabanay bandhig furan oo khadka onlaynka iyo xog aruurin laga bilaabo Luulyo 2 ilaa Luulyo 28. Bandhiga furan ee onlaynka ah waxaa lagu wadaay macluumaadka mashruuca, oo ay kujiraan tixgelinada doorashada. Ujeedada xog aruurintu waxay ahayd helida fikirka xubnaha bulshada iyo walaacyada ay qabaan.
Xog aruurinta waxaa ka qaybqaatay 525 qof.

Jawaab bixiyaasha xog aruurintu waxay xuseen in la xoojiyey gelitaanka iyo ammaanka dadka lugaynaya, baaskiilada wada, ama raacaya baabuurta ay yihiin tixgalinta ugu muhiimsan ee naqshadaynta. Sidoo kale dadka jawaab bixiyaasha ah xuseen in naqshada boosteejadu noqoto tan ugu yar ee keeni karta carqaladeyn iyo saameynta ganacsiyada yaryar, waxayna muujiyeen walaacyada ay ka qabaan kirada, qaylada, iyo saameynta guud ee aagga.

Marka laga imaado wadahadalka furan ee oonleenka ah, Sound Transit waxay martigelisay wadahadal guri furan iyo shan xafladood oo la isku imaaday. Shaqaalaha wacyigelinta ayaa hawsha ka qaybgeliyay in ka badan 220 qof bandhigyadaan.

Dadkii ka soo qaybgalay xaflada bandhiga furan ee toos ah iyo fadhiyada miiska ayaa muujiyay taageerada ay u hayaan boostaajo ku taal agagaarka South Graham Street. Dadku waxay muujiyeen rabitaankooda ku aadan inay kor u qaadaan badbaadada kuwa u safraya kana imaanaya boosteejada, gaar ahaan dadka lugeynaya. Xubnaha bulshadu waxay soo jeediyeen in la maalgashado kaabayaasha dadka lugaynaya iyo isku xirka basaska si loo fududeeyo.
Sidoo kale Xubnaha bulshada ayaa si cad u qeexay codsiyada lagu ilaalinayo ganacsiyada deegaanka ka jira.

Waxaan kor u qaadnay munaasabadaha wahadalada furan waxaana kor u qaadnay wacyigelinta mashruuca anagoo u dirnay boostaajooyin guryaha iyo ganacsiyada aaggga, waxaana iimaylka u dirnay ururada bulshada, waxaan ku faafinay baraha bulshada, iyo waxaana ku dhajinay waraaqo ganacsiyada maxalliga ah iyo meelaha bulshadu iskugu timaado. Baahinta wararka mashruuca iyo fursad ka qeybgalinta ayaa kasoo muuqday The Urbanist iyo Seattle Transit Blog.

Falcelinada bulshada, oo ay weheliyaan tixgalin farsamo, ayaa ka warbixin doonta sida aan horey ugu wadeyno mashruucaan iyo injineernimada fikradeed/faalooyinka deegaan ahaaneed. Dabayaaqada sanadkaan, waan sameyn doonaa warbixin cusub oo ku saabsan warbixinada bulshada.


***QABYO QORAAL**– Waxaa loogu talagalay wada hadalka gudaha oo kaliya. Dib looma eegin lamana ansixin ayadoo dhinac la matalaayo.*